



# WAXAAD KARTAA INAAD KA ILAALISO IYAGA

Ka hortagga saamaynta leh ee  
gudniinka jarida xubinta taranka  
gudaha Jarmalka

Tallaabada waxaa ku talisay  
**SAIDA International e.V.**





## Waa maxay ujeedada warsidahan?

Xirfad yaqaanada qaaliga ah iyo dadka xiisaynayow

Carruurto waxay u baahan tahay bulshadda iyo dowladda -- gaar ahaan marka ay dhib kaga timaado rabshada gudaha goyska ah, Gudaha Jarmalka, kuman yaal badan oo hablo ah ayaa loogu hanjabaa qaab nooc gaar ah oo gudniinka jaridda ah oo rabsho wata.

Haweenka ay saamaysay iyo hablahu way inagu dhex nool yihiin iyagoon la ogaan. Waxay si dhif ah u waydiistaan caawimo Si fudud ugama jeesan karno.

Waayyo aragnimo ka timid wadama badan asalkood waxay muujinaysaa sida joogtada dhaqan uu u noqoday. Si kastaba ha ahaatee, waxaanu sidoo kale ka ognahay in barnaamijka ilaalin gabdhaha ee SAIDA gudaha Burkino Faso in ilaalin waxtar leh ay suuragal tahay. Dadka badan ee lagu wargeliyay waxa ka dambeeyaa rabshadan la isku soo dhiib-dhiibay qarniyo dhedhood oo ay garanayaan xaalada gudaha Jarmalka.

fursada badan ee ilaalinta. Sidaas awgeed, qof kasta dareenkiisa ayaa loo baahan yahay si loo abuuro saamayn ka hortag leh.

Shaqaalah xirfada leh xirfadaha bulshadda, caafimaadka iyo waxbarashada siiba booliska iyo qaybta cadaalada door muhiim ah ayay ka qaataan.

Warsidahan waxaynu uga goleenahay inaan taageero saarno markaas si sax ah waxaad u qiimayn kartaa khatarta oo waxaad wax ku biirin kartaa hablaha u korayya si badbaado leh. Sababtoo ah: **WAXAAD KARTAA INAAD KA ILAALISO IYAGA**

Kii daacada kuu ahaa, **Simone Schwarz**  
Guddoomiyaha haweenayda maamulaysa



### Maxay dhab ahaan FGM la macno tahay?

Soo gaabinta Ingiriisiga ee FGM waxay u taagan tahay Gudniinka Jarida xubinta taranka Dhediga. Eray bixinta waxaa la go'aamiyay 1990 waxaan go'aamiyay Inter-African Committee on Harmful Traditional Practices (IAC)).

Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) waxay ku dartay eraya FGM isticmaalka luqadooda

rasmiga ah. Erayga „Gudniinka Dhediga“ ama „gudniinka xubinta taranka Dhediga“ inta badan ayaa la isticmaalaan.

Xubnaha IAC ee leh hindisiyaasha 29 wadan ee Afrikaanka ah, Yurub iyo Ustaraaliya waxay u diideen eray bixintan sidii xaqirid, iyagoo sheegay inay waxyeelaynayaan dagaalka ka dhanka ah rabshadan gudniinka.

SAIDA waxay taageertaa baaqa l\ ee dadyowga adduunku inay joogto isticmaalaan gudniinka jarida xubinta taranka haweenka.



Aqoonso falka khatarta si  
masuulnima leh oo u  
ilaali hablaha si waxtar leh



### Akhristaha qaaliga ahow,

waxaanu nahay bulsho furan oo dul qaad leh. Dadka Jarmalka ugu yimid dhaqamada kale waxay leeyihiin fursada ay ugu dhaqmaan dhaqamadooda iyo caadooyinkooda si iyaga waafaqsan. Si kastaba ha ahaatee, tan waxaa keliya oo lagu dabaqaa ilaa inta xuquuqda aasaasiga ah ee kuwa kale aan lagu xad gudbin. Xuquuqda aadamahu dhaqan ahaan lagama wada hadlo. Gudniinka jarida xubinta taranka haweenka ee inanta waa dhaawac jidhka ah oo darran oo sidoo kale waxa uu keenaa waxyeelo nafsiyeed oo khatar ah. Waa qaab axmaqnimo ah oo ah takoorka gaarka ah ee sinjiga ah iyo rabshad.

Sidaas awgeed waa muhiim in qaybaha xirfad yaqaaneed, kuwaas oo suuragal ahaan la xidhidha dhibanayaasha qaab maalinle ah, lagu baraarujiyi xaalada. Xirfad yaqaanada caafimaadka iyo shaqaalaha bulshaddu waa inay helaan bixinta tababarada habboon. Sababtoo ah waa muhiim in la ogaado oo loo dhegaysto si feejigan hoyga la wadaago ee qaxootiga, dugsiyada barbaarinta, dugsiyada iyo xarumaha dhakhtarka.

Dhismaha bulshadda ragu maamulaan waxay sameeyaan aasaaska ku dhaqanka gudniinka jarida xubinta taranka dhediga. Waa nidaam dhib badan si loo burburiyo dhismayaashan. Macluumaadka, waxbarashada iyo awoodsiinta ayaa door muhiim ah ka ciyara. Waa inay ahaataa hadafkeenu inaynu ka ilaalinno hablaha inagu dhex nool farogelintan khatarta ah oo aynu siino haweenka saamayntu gaadhad taageerada ku habboon. Waa inaynu wax ku biirino hablaha halista la geliyay inay awood yeeshaan, isku kalsoonaadaan oo dhiiranaadaan iyo noqoshadooda haween madax banaan.

Ururka SAIDA International e.V. waxaa ka go'an shaqada ka hortagga sanado badan oo waxa uu siiyaa la talin hablaha iyo haweenka kahtarta galay oo ay saamaysan. Wuxaan u rajaynayaa dadka ay wada shaqeeyaan guul joogta ah oo ka soo baxda shaqadan muhiimka ah.

Borofosoor Digtoor Thomas Fabian

Duqa magaalada iyo xubinta gollaha maxaliga ah ee dhalin yarada, arrimaha bulshadda, caafimaadka iyo dugsiyada ku yaala Leipzig.



### Mudanayaal iyo marwooyin,

dhaqanka gudniinka jarida xubinta taranka waxaa loo isticmaalaa wadama qaarkood si loo xakameeyo dhaqanka dhediga. Hablaha aan waxyeeladu gaadhin waxaa loo sumcad dilaa sidii kuwa "aan nadif ahayn" oo "aan la guursan karin". Iyaddoo ay natijjadu tahay socdaalka, dhibaatadu hadda waxay noqonaysaa mid isha aad loogu hayyo gudaha noloshadad waynaha. Tira isa soo taraya oo haween iyo carruur ah kuwaas oo wadankooda asalka ah uu qaabkan rabshada ah ku baahsan yahay ayaa hadda ku nool Saxony. Socdaalka gudihiisa, carruurta kama khatar gelid yara oo haweenka ay saamaysayna waxay ku tiirsan yihiin caawimo. Ka hortagga si laisaga ilaaliyo gudniinka jarida xubinta taranka dhediga ee noocan rabshada ah waxa uu inagu keenaa caqabad wayn.

Waa hore ilaa 2015kii caasimad goboleedka Dresden waxay u heelanayn dhacdada mowduucan ah. Sanadkii 2016kii, shirka u horeeyay ee ku saabsanaa gudniinka jarida xubinta taranka dhediga waxay ka dhacday iyaddoo iskaashi lala samaynayo kuwa la shaqeeyaa sida SAIDA International e.V.. Qaabka waa la dejiyay oo ila amarkaasna dhacooyinka gaarka waxay ka dhacayeen sanad kasta gudaha caasimad goboleedka oo ku saabsanaa caafimaadka, sharciga iyo aragtiyaha bulshadda. Sii wadista falan qaynta ay wadaan kabiiradu waxay wax ku biirisaa xasaasi ku noqoshada iyo qorshayaasha adag ee tallaabada in la horumariyay. Xarunta kartida iyo isku xidhka ee shaqada hablaha iyo haweenka dhalinta yar (sowieso e.V.), SAIDA International e.V., Akifra e.V., Medea e.V. siiba Wasaaradda Arrimaha Bulshadda Gobolka Saxon iyo Wasiirkha Dhowrida Macmiilke ee Gobolka Sinaanta iyo Wada jirka, xafiiska gobolka Saxony, Sarkaalka Fursadaha Loo siman yahay waxa uu bixiyaa taageero dhammaan qaab aan maadi ahayn, dhaqaale iyo awooda abaabulkaba. Waxaan jecel nahay inaan u muujino mahadnaqayaga shaqadan!

Waxaanu rajaynayaa in warsidahan uu ku siiyo adiga qaybo talo soo jeedin wanaagsan oo wax lagaga qabanayo mowduucan adag oo waad ku mahadsantahay xiisahaaga.

Digtoor Alexandra-Kathrin Stanislaw-Kemenah

Fursadaha loo siman yahay ee haweenka iyo raga gudaha magaalo madaxda gobolka Dresden

## Macluumaadka Hore

Bulshadda qaramada kala duwan waxay sharci darro ka dhigtay gudniinka jarida xubinta taranka dhediga sidii rabshada xuquuqda aadama ah oo waxay ku mamnuuceen gudaha tiro shirwaynayaal caalami ah. Intas ka sakow, maalin kasta 8000 oo hablo ah ayaa xubnahooda la jaraa.

### Sida ay kala yihiin caalamka tiro ahaan

Markaasna, wadamo badan kuwaas oo gudniinka jarida xubnaha taranka haweenka ee hablahu aad ugu baahay waxay soo rogeen sharchiyo ciqaabeed.

Si kastaba ha ahaatee, sanad kasta ugu yaraan 3 milnyan oo hablood ayaa weli lagu sameeyaa xad gudubkan. 200 oo milyan oo hablo iyo haween ah ayaa ku noolaanaya cawaqaib khatar ah. Qiyaasta adduunka oo dhan taasi waa 20kiiba oo haween kasta.

Wadamada qaarkood, ugu badnaan mujtamaca haweenka ah oo dhan ayay saamaysaa, sida Masar, Gini iyo Soomaaliya. Wadamada kale ku dhaqanku keliya aad waxaa uu ugu baahay koox kala duwan oo isir.

Gudniinka jarida xubinta taranka waxaa loogu talo galay in lagu xakameeyo dhaqanka galmaada ee hablaho. Hablaho aan la taaban iyo qoysaskooda waa la caayaa, sumcada laga


### Dhiirigeli

Ujeedadada gudniinka jarida xubinta taranka haweenka waa in la xakameeyo galmaada hablaho oo laga dhigo kuwa u hogansama isticmaalka qaab darran oo rabshad ah. Bulshooyinka haweenka ku dhaqma guud ahaan waxaa loo arkaa sidii hanti iyo si aan nidaamsanayn ayaa loo takooraa.

Qareenada dhaqankan waxay dhisaan cadaadis wayn oo busheed. Haddii qoysku isku dayo inay hablahoodu ku koraan iyagoon la taaban, habalahu waxaa lagu canaantaa sidii „wasakh“ iyo dhiloojin. Cidna kama aqbashe cunto iyaga oo waxaa looga fikiraa kuwa aan la guursan karin. Sharafka qoyska oo dhan waxaa lagu xidhaa dhaqanka galmaada ee hablaho la dhalay.

### Tiro ahaan sida ay kala yihiin gudniinka jarida xubinta taranka haweenka

ee hablaho iyo haweenka u dhaxeeye 15 ilaa 49 sanadood.



## Ku dhaqanka

Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) waxay u soocaan gudniinka jarida xubinta taranka dhediga sidii dhamaan faro gelinta, taas oo xubinta taranka haweenka dibada ku taal si buuxda ama qayb ahaan loo jaray ama loo dhaawacay asbaabo aan la xidhiidhin caafimaad ahaan. Waxaa jira afar nooc:

### Jarida kintirka (Nooca I)

Qaybta la arki karo ee kintirka habalaha mid uun qayb ahaan ama gebi ahaan waa la jaraa.

### Jarida (Nooca II)

Debinta hoose iyo wakhtiyada qarkood qaybta sare ayaa inta badan sidoo kale qayb ahaan ama gebi ahaan la jaraa. Qiyaas ahaan 80 boqolkii ba dhibanayaasha waxaa lagu sameeyaa noocyada I iyo II.

### Jarida iyo tolida (Nooca III)

Xaalada qiyaastii 15 boqolkii ba hablaha, kintirka iyo dibinta sare iyo ta hoose ayaa la jaraa oo siilkoo waa laga kala xidhaa godka yar ee aayar sii daaya kaadida iyo dhiiga caadada.

Nabarka guud ahaan waa uu furnaan karaa galma koowaad ee u horaysa (**|Furitaanka**).

Dhalashada ka dib, nabarka inta badan si adga ayaa mar labbaad la isugu tolaa (**Isku tolid**)

WHO waxay diiwaanisay kala duwanaanshaha hoosta Nooca IV, sida gubida, xoqida, durista ama madanaynta kintirka, daloolka siilka iyo siilkaba. Dhaqanku waa uu kala duwan yahay iyada oo ku xidhan aaga, isirk, cida la taabacsan yahay iyo caadooyinka maxaliga ah.

## Duruufaha

Duruufaha caadiga ah ee dembiga xaaladaha caafimaad ahaan Aadka u xun iyo iyaddoon la isticmaalin oo laga saaray suuxiyayaasha iyo kiniinka xanuun baabi'iyyayaasha. Qalabka ay isticmaalaan kuwa guud ahaan ku xadguba dhediga waa mindiyo, dhagaxaan caaro fiiqan iyo makiinado. Waxay isticmaalaan dambas ama camuud si loo joojiyo dhiig baxa Tiro soo kordhaysa oo xirfad yaqaano caafimaad ah ayaa hadda aqbalaya inay u qabtaan dhaqanka si waafaqsan xaaladaha sixadooda kuwa ah qoysaska laddan. Tani waxaa loo adeegsadaa gaar ahaan Masar, Jabuuti ama Soomaaliya


## Cawaaqibka xad gudubka

Ee dhibanayaasha rabshada waxa uu leeyahay cawaaqib darran, inta badan cimir dheeraada.

**Cawaaqibka jidh ahaaneed ee daran waa** tusaale ahaan xanuun badan iyo dhiig bax aan la xakamayn karin, taas oo sababta xaalad naxdin ah oo keenta dhimasho. Cawaaqibka inta badan ah waa teetanada, celinta kaadida iyo ololka. Mudista, garaacida iyo xidhida afka mudada falka dembiga socdo inta badan waxay keentaa lafo jaba.

**Cawaaqibka jidhka ee xiliga dheer** waxay noqon karaan tusaale ahaan waxyeelada neerfaha, ka soo bax iyo nabar dheeecaan leh. Caabuqa kaadi mareenka, ilmagaleenk iyo ugxn sidhaa inta badan waxay sababaan dhalmo la'aan. Haddii xididka kaadida iyo xidmaha sidoo kale waxyelo gaadhay, cawaaqib badan oo xakamayn la'aanta kaadida ah ayaa jirta. Inta badan waxaa jira dhibaatooyinka galma, dhiiga caadada, uurka iyo dhalida ilmaha.


## Noocyada kala duwan ee gudniinka jarida



**Nooca I**  
Jarida kintirka



**Nooca II**  
Jarida



**Nooca III**  
Jarida kintirka iyo tolida



**Nooca IV**  
Kala duwanaanshaha



## Da'ada halista

Hablaha waxay khatar ugu jiraan dhallaanimada ilaa qaan gaadhka. Badanka waxaa ka mariyaa gudniinka jarida xubinta taranka carruurnimada. Si kasytaba ha ahaatee, wadama qaarkood noocyada da'ada way is yar beddeshaa iyaddoo ay sababtay sharciyada ciqaabta cusub.

## Xaalada gudaha Jarmalka

Sida waafaqsan daraasada Wasaarada Federaalka ee Arrimaha Qoyska

2017kii, qiyaas ahaan 47,000 hablood iyo haween ah ayaa khatar ugu jira ama hadda ka hor ah dhibanayaasha gudniinka jarida xubinta taranka haweenka. Iyaddoo ku salaysan tirada dad waynaha hadda, waxaanu moodnay in 2019kii ay jiraan in ka badan 81,000 oo ay saamaysay oo khatar ugu jira. Caqabad wayn ayay ku tahay bulshadda inay si sax ah waxuga qabato xaaladan.

### Sababtee ayaanu wax uga q abanaynaa?

Gudniinka jarida xubinta taranka dhegidaa waa xad gudub wayn oo xuquuqda aasaasiga ah iyo khatar aad u adag oo gobolku waa inuu dhammaystiraa waajibkiisa si loo ilaaliyo. Xuquuqda aasaasiga ah ee sharafka aadamaaha, nolosha iyo wada jir kara jidhka ayaa lagu xadgudbaa.

Gudniinka jarida xubinta trunku waa qaab darran oo xad gudub oo aan lala simi karin cawaqaab aan dib loo hagaajin karin oo dhibaha gaadha. Sidaas awgeed, tallaabada dhabta ah ee joogtada ah waa ulama huraan badbaadada iska ilaalinta khatarta -- waxaa jira hal fursad oo keliya!

### Mowqifka sharchiyeed

Ilaa iyo 2013kii faldembi oo gaar ah ayaa lagu maamulayay gudniinka jarida xubinta taranka oo dhigaysa in dembigu qaado ciqaab ama wax aan ka yarayn hal sano oo xabsi ah qof kasta oo jara xubinta taranka dibada ee qof dhedig ah (qaybta 226a Xeerka Ciqaabta Jarmalka) Sida waafaqsan tirakoobka dembiyad ala baahiyay, dhammaadka 2017kii may jirin wax dacwad sharchi ah oo wafaqsan qaybta 226a Xeerka Ciqaabta Jarmalka ama eedo fal dambiyed ah oo ka dhan ah waalidka. Tan sababteedu waa in dembiga la galay

si gaar ah, caddayntu waxay ka qarsoontaa dadka kale oo hablaha la waxyeeleyay way aamusaan iyagoo ka baqanaya culaysa qoyskooda.

Dhibaatada ugu duran waa ballanta caafimaadka qarsoon, sababtoo ah hadidi jarida xubinta la ogaado ma jiro waajib looga warbixinyo masuuliyiinta sida ay xaaladu tahay gudaha Faransiiska. Xaalada shakiga ee dhakhtarada dembiga dhici kara waxa ay qabtaan si kastaba ha haaatee xaqa lagu wargeliyo xafiiska daryeelka dhalin yarada.

Waxaa sidoo kale jira baadhitaanka caafimaadka waajibka ah ee gudah gobolada federaalka gaarka ah, taas oo xad gudubku cadaado.,

Si looga hortaggo dembiyada dibada ah, maxkamadaha qoyska waxay awood ku bixiyaan in waalidku aanay u qaadin hablahooda wadankooda asalka ah xaalado gaar ah.



SAIDA waxay ku baaqaysaa waajibka in looga warbixiyo masuuliyiinta iyo baadhitaano caafimaad oo kahsab ah wadanka oo dhan carruurta oo dhan.

## Hablaha iyo haweenka ay saamaysay iyo khatart augu jira gudaha Jarmalka – Ku qiyaas 2018/2019

Dhalashada	Sida ay ku kala yihiin wadamada asalka ah	Hablaha iyo haweenka gudaha Jarmalka	Hablahan ka yar 18 sanadood	Ee haweenkan ka wayn 18	Hablaha khartara ugu jira	Haweenka ay saamaysay	Wadarta khatarta iyo inta ay saamaysay
Masar	87%	10,570	2,855	7,715	2,484	6,712	9,196
Itoobiya	65%	9,095	1,980	7,115	1,287	4,625	5,912
Benin	9%	840	215	625	19	56	76
Burkina Faso	76%	585	130	455	99	346	445
Ayfari koosti	37%	2,185	440	1,745	163	646	808
Jabuuti	93%	75	10	65	9	60	70
Ereteriya	83%	23,005	6,230	16,775	5,171	13,923	19,094
Gaambiya	75%	1,905	410	1,495	308	1,121	1,429
Gaana	4%	16,890	3,890	13,000	156	520	676
Gini	97%	3,490	940	2,550	912	2,474	3,385
Gini-Bissaaw	45%	310	85	205	225	92	317
Indooniisiya	49%	11,370	540	10,835	265	5,309	5,574
Ciraaq**	8%	103,050	40,835	62,215	3,267	4,977	8,244
Yaman	19%	2,345	670	1,675	127	318	446
Kameroon	1%	10,655	1,490	9,165	15	92	107
Kinya	21%	8,320	830	7,490	174	1,573	1,747
Laybeeriya	44%	290	55	235	24	103	128
Maali	83%	455	130	325	108	270	378
Muretaniya	67%	170	30	140	20	94	114
Nayjar	2%	240	70	170	1	3	5
Nayjeeriya	18%	28,095	9,420	18,680	1,696	3,362	5,058
Sinigal	23%	1,390	215	1,175	49	270	320
Sirra Liyoon	86%	1,260	360	900	310	774	1,084
Soomaaliya	98%	15,250	5,230	10,020	5,125	9,820	14,945
Suuddaan ***	87%	1,860	545	1,315	474	1,144	1,618
Tansaaniya	10%	875	95	780	10	78	88
Togo	5%	5,005	920	4,085	46	204	250
Jaad	38%	140	50	85	19	32	51
Yugaandha ****	1%	1,340	175	1,165	2	12	13
Jamhuuriyada Afrikada Dhexe	24 %	50	10	40	2	10	12
<b>Wadarta guud</b>	<b>261,110</b>	<b>78,855</b>	<b>182,240</b>	<b>22,566</b>	<b>59,021</b>	<b>81,587</b>	

Ilaha: Xafiiska tira koobka federaaliga, mujatmaca dhediga ajnabiga sida waafaqsan dhalashada iyo da'da 31.12.2018 Xogta sida ay kala yihiin wadamada asalka ah waxaa laga soo qaaday warbixinta UNICEF "Gudniinka Jarida xubinta taranka/Jarida" Oktoobar 2018 iyo, Borofaylk Tirakoobka ee Gudniinka Jarida Xubinta taranka Dhediga Indooniisiya " 2019 Xogta waxa isku dارتay SAIDA International e.V., laga bilaabo Abril 2019. Sharacaada habka iyo qaababka guud ahaaneed bogga www.saida.de/genitalverstümmelung/situation-in-europa

\* Xogta Indooniisiya sida waafaqsan Xog ururinta Cilmi baadhida Caafimaadka Aasaasiga ah (RISKEDSAS) 2013;

\*\* Xogta Ciraaq waxay tixraacdha gobolada Waqooyiga Ciraaq (Gobolka ismaamulka leh ee Kurdustaan);

\*\*\* Macluumaadka Suuddaan sidoo kale waxa uu ka kooban yahay tirooyinka koonfurta Suuddaan, \*\*\*\* keliya xaalado gooni ah.

# Ka hortagga waxtarka leh

## Caqadaha wajahaya xirfad yaqaanada

Wasaarada Federaalka ee Arrimaha Qoyska si cad waxay u sheegtaa in gudniinka jarida xubinta taranka "shaki la'aan waa khatar daran daryeelka carruurta" oo taas "guddida masuulka ah ee daryeelka dhalinyarada bulshadda iyo maxkamadahu loogu yeedho si loo xaqiijiyo ka ilaalinta hablaha khatartan."

Qaabkan ku xad gudubka ilmaha ee hablaha si kastaba ha ahaatee waa mid aad u gaar ah in fikradaha ka yimid ka hortagga qaabab kale ee rabshada ah aan si fudud loo qaadan. Sidaas awgeed, xirfad yaqaanada waxa ay la kulmaan caqad gaar ah.

## Qiimaynta khatarta

Dadka wax ku biiriya ilaalinta hablalu waa inay ogsoonaadaan sida loo aqoonsado khatarta oo la qiimeeyo khatarta.

### Khatarta hablalu waxay ku tiirsan tahay

- baahitaanka gudniinka jarida xubinta taranka haweenka gudaha wadanka qoyska asalka ah iyo
- heerka qaraabada dhediga ah

### Khatartu kuma xidhna

- wacyi gelinta masuuliyiinta falka dembiyeed.
- aqonta ilaa heerka iyo cawaaqibka
- heerka waxbarashadda iyo dhexda bulshadda ama
- da'da inanta.

Badanka hablaha lagu sameeyo falka waxay u dhaxeeyan carruurnimada hore iyo 15 sanadood da' ah. Si kastaba ha ahaatee, da'da khatarta way kala duwan tahay wax badan oo badan, gaar ahaan socdaalka. Tan macnaheedu waxa weeye in hablaha badankeeda sidoo kale la ilaalintu karo.

Xaalada tilmaamaha khatarta, fadlan qaado dhammaan doorashooyinka sharciga ah. Niyada ku hay in la falan qaynta waalidka kuma filna. Qaybta dhammayska tiran ee qiyaasaha had iyo jeer waa loo baahan yahay. Sababtoo ah gudniinka jarida xubinta taranka haweenka waa qaab aan la barbar dhigi karin ee xad gudubka, waxaa jiray keliya hal fursadood oo ilaalinta ah.

## Ka ilaalinta xaalada khatarta ah ee khatarta marka loo safarayo wadanka asalka ah.

Haddii inan asalkeeda socdaal ka soo jeedo u safarto keli ama iyadoo la socota waalidkeeda ila awadanka asalka ah ee qoyska, tan waxaa loo arki karaa sidii khatar dhici karta.

Asbaabaha go'aanka leh ee qiimaynta waa xaalada wadanka la xidhiidha iyo xaqiiqda in masuuliyiinta aanay heli karin fahanka xaalada qoyska maxaliga ah ee Jarmalka.

Xafiiska daryeelka dhalin yarada waxay samay kartaa ka ilaalinta dembiga la galay dalka dibadiisa iyagoo isticmaalaya ku dhawaaqida xayiraada xaqaa in go'aan laga gaadhay si go'aan looga gaadho meesha la degen yahay.



BGH waxay siisaa ahmiyada u saraysa xuquuqda ilmaha ee ilaalinta sharaftooda aadaminimo iyo wada jirka jidhka ah.

Go'aanka maxkamada federaalka ah (BGH) laga bilabo 15.12.2004, XII ZB 166/03 onlayn ah: juris.bundesgerichtshof.de

## Ka ilaalinta xaalada khatarta ah gudaha Jarmalka

Haddii wax shaki ah uu jiro in gabadh yar lagu guddo Jarmalka gudahiisa ama wadan kale oo Yurub ah, waxaanu ku talinaynaa xafiisyada daryeelka dhalin yaradu inay qaadaan tallaabada soo socota.:

- Wax ka qabad ayaa la sameeyay keliya ku salaysan xaqiiqda ina u safarka wadanka khatarta ah ay dhici karto.
- Qorshaynta cad ee falka dembiga waalidka laguma yaraysan ama laguma xaqirin.
- Qiimaynta khatarta dhabta ah had iyo jeer waxay ku salaysnayd qiimaynta xaalada gudaha wadanka la xidhiidha. Baahinta onlayska ah ee wadanka oo dhan waxay soo saartaa khatarta sare ee xad dhaafka ah.
- Gudniinka jarida xubinta taranka dhediga waxaa loo qeexaa sida xad gudubka duran ee leh cawaaqib aan ala hagaajin karin oo aan sinaba aanay u adkaysan karin carruurtu. Sidaas awgeed waa in laga hortagga
- Xuquuqda waalidka iyo danaha suuragalka ah ee carruurtu si loo booqdo wadanka ay u dhasheen iyadodo ay sababtay xaqaa ilmahu uu leeyahay nolosha iyo wada jirka jidh ahaaneed.

## Caawimada iyo la talinta

Haddii aad hayso wax su'aalo ah, fadlan dareen xoriyada aad toos nagula soo xidhiidhto lambarkan t wakhti kasta:

**Xarunta latalinta SAIDA ee hablaha iyo  
haweenka dhib ka soo gaadhay gudniinka  
jarida xubinta taranka dhediga  
Telefoonka: +49 (0)341 247 46 69  
Moobilka: +49 (0)1590 166 77 63  
limayl u dir: beratung@saida.de**

Marka lagu daro la talinta, waxaanu sidoo kale siinaa shirarka iyo koorsoyin tababar ah dadka xirfad yaqaanada ah, Xarunta kartida SAIDA oo la shaqaynaya rugta caafimaadka St. Georgwaa meesha xidhiidhka qaybaha badan ee ku yaala badhtamaha Jarmalka wixii caawimada caafimaadka loo baahdo ah.

Xidhiidhada xafiisaya daryeelka dhalin yarada, carruurta iyo adeegyada gurmadka dhalin yarada iyo xafiisaya la talinta aagaaga waxay ku qoran yihiin interntka.

Khadka caawimada qaranka ee rabshada ku liidka ah haweenka waxaa la heli karaa saacada oo dhan waana bilaasha **Tel. 08000 116 016**.

**Xaaladaha khatarta degdega ah wax booliska  
wixii ah adeegyada gurmadka lambarka 110.**

**Fadlan caawi ilaalinta dhibanayaasha!**




### Akoonka deeqaha

xaga Ethikbank

**IBAN DE61 8309 4495 0003 0283 13**

Deeqaha la siinayo SAIDA dabcan waxaa laga jarayaa cashuurta. Dhammaan faahfaahinta ee dakhligayaga iyo kharashka waxay ku qoran yihiin onlayn saida.de/transparenz.



### Daabacadda

#### Daabacaha

SAIDA International e.V.

Käthe-Kollwitz-Str. 1

04109 Leipzig

limayl u dir: info@saida.de

Simone Schwarz,

Jan Holtmeyer, Katja Novák

Xuquuqda daabacaada Simone Schwarz (marka laga reebo pp. 3aad iyo 4aad)

#### Tafatirayaasha

#### Sawirada

2aad daabacaadda wax laga beddelay laga bilaabo 2019kii;

Daabacaddii koowaad ka timid

2016kii

gudaha xafiiska SAIDA office,

boos ahaan oo ka soo dejiso

saida.de/IhrSchutzbistDu

#### Heerka

#### Xubin ka noqoshada

**SAIDA International e. V.** Waxay u ololaynaysay laga bilaabo 2010kii hirgelinta joogtada ah ee haweenka iyo carruurta xuquuqdooda wadamada soo koroya.

Waxaanu caawimo gudaha ah u bixinaa si wax looga qabto rabshada u gaarka ah sinjiga iyo cadaadiska. Waxaanu wax ku tarnaadaha nolosha waarida la horumariyo gudaha bulshooyinka dhexda mashaariicda adag ee ilaalinta, waxbarashada iyo caafimaadka hablaha.

Macluumaadka dheeraadka ah booqo **www.saida.de**.

 [saidainternational](#)    [saida\\_info](#)    [saida\\_international](#)    [SAIDA International e.V.](#)



**Xidhiidhka**  
SAIDA International e.V.  
Landsberger Str. 7  
04157 Leipzig

**Xidhiidhka**  
Simone Schwarz  
**Telefoonka**  
+49 (0)341 247 46 69

**limayl u dir:**  
[info@saida.de](mailto:info@saida.de)  
[www.saida.de](http://www.saida.de)

Daabcaaada buug yaraan waxaa kafaalo qaaday magaala madaxda gobolka Dresden.

gefördert durch  
die Landeshauptstadt  
Dresden



Dresden,  
Dresde